



# Countywide Planning Policies

## Environment



King County

### Dulmarka

Cutubka Environment (Bii'ada) iyo **Countywide Planning Policies** (CPPs, Xeerarka Qorshaynta Degmada oo Dhan) ayaa haga magaaloyinka iyo King County si ay qiimayn iyo wax ka badal ugu sameeyaan qorshayaashooda balaaran si loo difaaco bii'ada dabiiciga ah loona yareeyo saamaynada horay u jiray ee bii'ada.

Isbadalada xeerka ee lagu sameeyay cutubkaan ayaa tiir dhexaad u ah sinaanta iyo cadaalada bulshada, raadinaaya in si xeeladaysan loo yareeyo saamaynada hore iyo kuwa hadda ee bii'ada kuna dhacaaya bulshooyinka safka hore ayadoo muhiimada la siinaayo bulshooyinka in ta laga shaqaynaayo yoolalka soo celinta bilicda bii'ada, difaaca, iyo yaraynta.

### Isbadalada Xeerka

Isbadalka cutubka Environment ayaa ka hadlaaya qorshaynta yaraynta iyo adkaysiga isbadalka cimilada, adeegsiga sayniska ugu fiican ee la helo karo, iyo abuurista yoolalka balaaran ee sii daynta gaaska cagaaran iyo sunta kaarboonka si loo gaaro kaarboon dhexdhexaad ah loona yareeyo korarka heerkulka caalamka.

Xeerarka lasoo jeediyay waxay muhiimada siiyaan sinaanta iyo cadaalada bulshada ayagoo muhiimada siiya yaraynta, kahortaga, iyo hormarinta dadaalada ay xubnaha bulshada nugul ee safka hore, ay si aan cadaalad ahayn u saameeyeen saamaynada bii'ada, noloha.

Isbadalku wuxuu faahfaahinayaa farsamooyinka hormarinta si loo taageero hawo, biyo, iyo dhul caafimaad leh. Waxay sidoo kale ka hadlaysaa soo saarista tamar nadiif ah iyo maaraynta saamaynada ka imaanaaya xarumaha naaftada isticmaala.

Ilaalinta, kaydinta, iyo soo celinta bii'ada dabiiciga ah ayaa ah muhiimadaha koobaad ee cutubkaan isbadaladuna waxay xaqiijinayaan in shaqadaan ay sii socoto si looga guul gaaro mustaqbal raaxo leh.

### Saamaynada Isbadalada Xeerka

- Difaacida iyo soo celinta khayraadka dabiiciga ah ee qariya kaydiyana kaarboonka.
- Xalinta xarumaha shidaalka isticmaala si loo difaaco caafimaadka, badqabka, iyo faya dhawrka dadwaynaha; iyo si loo difaaco nidaamka noolaha dabiiciga ah si loo yareeyo isbadalka cimilada.
- Dadaalada muhiimad siinta sida qorshaha geedaha si kor loogu qaado geedaha isqabsanaaya Laguna beeraayo meelaha ay ku yar yihiin ama aysanba ku oolin, soo celinta goobaha muhiimka ah ee la dayacay, yaraynta wasaqda hawada, iyo furida meelo furan oo ay dadka Black, Indigenous, and other people of color (Madoowga, Asaliyiinta ah, iyo dadka kale ee aan cadaanka ahayn), danyarta, iyo xubnaha bulshada ee safka hore ku nool yihiin.
- Yaraynta waxyeelooyinka saamaynada cimiladu ku reebto deegaanka ayadoo la adeegsanaayo higsiyada degmada oo dhan ee yaraynta gaaska cagaaran oo lagu dajiyay King County-Cities Climate Collaboration (K4C, Iskaashiga Cimilada ee Magaaloyinka King County).

### Waxaan U baahan Nahay Fikirkaaga!

Haddii aad doonayso inaad faallo guud bixiso, aad su'aalo ka qabto CPP ama maaraynta kobaca, ama doonayso inaad door ku yeelato, fadlan iimeel u dir [gmpc@kingcounty.gov](mailto:gmpc@kingcounty.gov) ama la xariir Ben Larson adoo wacaaya (206) 263-9560.

### Waa maxay Countywide Planning Policies?

Countywide Planning Policies ama CPP waa taxanayaalka xeerar maamula ciladaha maaraynta kobaca ee Degmada King. Growth Management Planning Council (GMPC, Golaha Qorshaynta Maamulka Kobaca) ayaa isku keena saraakiisha la doorto ee ka socda Degmada King iyo magaaloyinka iyo maamulada hoostaga si loo abuurto xeerarka CPP.

CPP waxay bixiyaan higsiga wadanka oo dhan waana naqshada Degmada King iyo magaalada kasta oo King ka tirsan u adeegsadaan abuurista qorshaheeda gaarka ah ee balaaran, kaasoo ay qasab tahay inuu waafaqsan yahay CPP iyo [VISION 2050 \(HIGSIGA 2050\)](#).

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan CPP, Qorshayaasha Waawayn, iyo xogta kale ee la xariirta maaraynta kobaca, fadlan booqo bogga Degmada King ee Regional Planning (Qorshaynta Gobalka) adoo gujinaaya [lifaqaan](#).